DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 23AAD | CADADKA 7AAD | TAARIIKH: 27/07/23 | Lam. 02 |
|---|---|---|---|

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

# SHARCIGA WAX-KA-BADALKA 1-AAD EE DASTUURKA DOWLADDA PUNTLAND

## TUSMADA


| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Wax-ka-badalka 1-aad ee Dastuurka Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr. 02 ee 27-$^{ka}$ Luulyo 2023, kuna saabsan Sharciga Wax-ka-badalka 1-$^{aad}$ Dastuurka Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80$^{aad}$ farqadiisa 16-$^{aad}$ iyo Qodobka 139-$^{aad}$.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/41/2022, kuna taariikhaysan 26-$^{ka}$ July 2023.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1$^{aad}$**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Wax-ka-badalka 1-$^{aad}$ Dastuurka Dowadda Puntland

**Qodobka 2$^{aad}$**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3$^{aad}$**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

Office of the President
Puntland State of Somalia

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

***Tix:-*** **XGGW/DPL/41/2023** **Garoowe, Talaado, Taariikh:- 26/07/2023**

**Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntland** **Garoowe**

Ujeeddo:-**Ansixinta Wax Ka Bedelka Dastuurka Dawladda Puntland**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Qodobka 139-aad ee Dastuurka DPL |
| MARKUU ARKAY:- | Qoraalka Summadiisu tahay MW/DPS/52/2023, kuna taariikhaysan May 6, 2023, ujeedadiisuna tahay Wax ka bedelka Dastuurka DPL |
| MARKUU ARKAY:- | Qoraalka Summadiisu tahay XGGW/DPL/29/2023, kuna taariikhaysan 06/05/2023, ujeedadiisuna tahay Magacaabid Guddi. |
| MARKUU ARKAY:- | Qoraalka Summadiisu tahay XGGW/DPL/28/2023, kuna taariikhaysan 06/05/2023, ujeedadiisuna tahay Ka Soo Talo Bixin Sharci, kuna socotay Maxkamadda Dastuuriga ee Dawladda Puntland. |
| MARKUU ARKAY:- | Qoraalka Summadiisu tahay MDP/01/DPL/2023, kuna taariikhaysan 18/06/2023, ujeedadiisuna tahay Talo Bixin Sharci, kaas oo ka soo baxay Maxkmadda Dastuuriga ah ee DPL. |
| MARKUU ARKAY:- | Soojeedintii Guddiga Gaarka ah ee falanqeynta Hindisaha Wax ka bedelka Dastuurku ay Golaha Wakiillada usoo jeediyeen 20/06/2023. |

| | |
|---|---|
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey talo bixinta Guddiga Gaarka ah ee Falanqeynta Hindisaha Wax ka bedelka Dastuurka Kalfadhiga 52-aad, fadhigiisa 5-aad ee 20/06/2023. |
| MARKUU ARKAY:- | In dadweynaha Puntland lagu wargeliyey Hindisaha Wax ka bedelka Dastuurka si waafaqsan qodobka 139-aad farqadiisa 3-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland. |
| MARKUU ARKAY:- | Go'aankii Golaha Wakiilladu Kalfadhiga 52-aad, fadhigiisa 16-aad ee 25/07/2023 ay ku ogolaadeen wax ka bedelka Dastuurka Dawladda Puntland. Guntanka fadhiguna ahaa 60 mudane, waxaa oggol ugu codeeyey (54) mudane, diimo (6) mudane, mana jirin cid ka aamustay. |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

1. Ansixinta wax ka bedelka Dastuurka Dawladda Puntland ee qoraalkan ku lifaaqan si waafaqsan qodobka 139-aad faqradiisa 4-aad.
2. Wax ka bedelkan Dastuurka waxaa lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah loomana cuskan karo diidmada qayaxan ee Madaxweynaha sida ku cad qodobka 139-aad faqradiisa 6-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.
3. Iyadoo laga duulayo wax ka bedelka Dastuurka waxaa lagu wargelinayaa dhammaan hay'adaha dawladda ee uu saameynta ku yeelanayo wax ka bedelkani in ay soo diyaariyaan xeerarka ka dhalanaya ama u baahan dib u eegista si Golaha Wakiilladu u meelmariyo, loona waafajiyo wax ka bedelka Dastuurka.

**Wada Shaqayn Wacan**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND * OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

## GOLAHA WAKIILLADA

---

# XEERKA WAX-KABEDELKA DASTUURKA DAWLADDA PUNTLAND 2023 OO AH SOO JEEDIN KA TIMI GOLAHA XUKUUMMADDA DAWLADDA PUNTLAND

## WAX KA BEDELKA 1-AAD

## 1ST AMENDMENT

**LUULIYO, 2023**

## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka wax-ka bedelka Dastuurka Dawladda Puntland,2023.

## Wax ka bedelka qodobka 7-aad ee Dastuurka

Qodobka 7-aad faqradiisa 1-aad waxaa loo bedelay sidan "Dhulka Puntland waxa uu ka kooban yahay gobollada Bari, Nugaal, Sool, Cayn, Karkaar, Mudug, Haylaan, Sanaag iyo Raas Casayr".

## Wax-kabedelka Qodobka 44-aad ee Dastuurka.

Qodobka 44-aad faqradiisa 2-aad waxaa loo bedelay sidan "Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka, Xubnaha Golaha Wakiillada iyo Golayaasha degmooyinku waa mansabyada ay dadweynuhu tooska usoo dooranayaan".

## Wax-kabedelka Qodobka 46-aad ee Dastuurka

Qodobka 46-aad faqradiisa 3-aad waxaa loo bedelay sidan "Ururada siyaasadeed ee doorashada kowaad ee golayaasha deegaanka ka hela xubno ayaa noqonaya xisbiyada siyaasadeed ee rasmiga ah". Sidoo kale isla qodobkan faqradiisa 4-aad waxaa loo bedelay sidan "Doorashooyinka xiga ee xisbiyadu waxay noqonayaan shantii sanaba mar, waxaana xisbi rasmi ah noqonaya urur siyaasadeedka hela boqolkiiba shan (5%) tirada guud ee cod-bixiyayaasha golayaasha deegaanka Puntland".

## Wax-kabedelka Qodobka 47-aad ee Dastuurka

Qodobka 47-aad faqradiisa 5-aad waxaa loo bedelay sidan "Haddii xisbiyada jira ee sharciga ah midkood burburo ama la xiro, guddiga doorashooyinka Puntland ayaa ururkii siyaasadeed ee kaalinta ku xigta galay doorashooyinka Golayaasha degaanka ee ugu dambeeyey ugu yeeraya inuu noqdo xisbiga siyaasadeed ee kaalinta bannaanaatay buuxinaaya".

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Wax-kabedelka Qodobka 56-aad ee Dastuurka

Qodobka 56-aad waxaa loo bedelay sidan "Hannaanka Dawladda Puntland wuxuu ku dhisan yahay nidaamka doorashooyinka dimuqraadiga ah ee Madaxtooyo, Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka waxaa soo dooranaya Dadweynaha, sida ku cad qodobka 44-aad ee Dastuurka".

## Wax-kabedelka Qodobka 57-aad ee Dastuurka

Qodobka 57-aad xarafka (j) waxaa loo bedelay sidan Qaybta Garsoorka( Golaha Garsoorka).

## Wax-kabedelka Qodobka 62-aad ee Dastuurka

Qodobka 62-aad faqradiisa 1-aad waxaa lagu kaabay labo xaraf oo cusub kuwaas oo kala noqonaya "Xarafka (kh): Ay caddaato in xubintu si badheedh ah ugu xadgudubtey Shareecada Islaamka, Dastuurka, Xeer-hoosaadka Golaha iyo Qawaaniinta kale ee dalka" iyo "Xarafka (d): Markii Xubinta xildhibaan kamid ah Golaha Wakiillada laga qaadayo xasanadda waa inay oggolaadaan xasaanad ka qaadistiisa saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiilada".

## Wax-kabedelka Qodobka 64-aad ee Dastuurka

Qodobka 64-aad faqradiisa 1-aad waxaa loo bedelay sidan "Curinta, dib-u-eegidda, oggolaanshaha, diidmada, wax-ka-beddelidda iyo burinta Xeerarka Puntland". Sidoo kale waxaa gebi ahaanba laga saaray faqradda 8-aad ee qodobka 64-aad. Waxaa iyana qodobkan lagu kaabay faqrad cusub oo noqonaysa faqradda 8-aad taas oo u dhigan "Xasaanadsiinta Garsoorayaasha Maxkamadda Sare, Maxkamada Dastuuriga ah, Xeer-ilaaliyaha Guud, Hantidhowrka Guud iyo Gudoomiyaha Bangiga, Goluhu wuxuu ku ansixinayaa cod kala bar iyo hal (1/2+1) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada mid mid, ka badan ama dhammaantood". Waxaa kale oo qodobkan lagu daray Faqrad cusub oo noqonaysa faqradda 23-aad taas oo ka hadlaysa Xil-waayista Guddoonka Golaha Wakiilladda waxayna u dhigan tahay sidan:-



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

23) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigennada Golaha Wakiilladu waxay xilka ku waayi karaan;

b. Geeri

t. Istaqaalo qoraal ah oo uu u soo gudbiyey Golaha, Goluhuna ka aqbalo.

j. Maqnaansho cudurdaar la'aan ah oo gaaraysa 60 beri oo isku xiga.

x. Ku xadgudub Shareecada Islaamka, Dastuurka, Xeer-hoosaadka iyo shuruucda kale ee dalka.

kh. Xil gudasho la'aan joogto ah sida: - dhimirkiisa oo wax u dhinmaan (waalli), ayna caddeeyaan guddi takhaatiir ah oo la aqoonsan yahay, laguna kalsoon yahay.

d. Mar kasta oo ay muddada xilhayntu ka dhammaato.

r. Xukun kama dambays ah oo ay ku riddey Maxkamad awood u leh uuna ku mutaysanayo ciqaab.

s. Haddii ay dhacaan arrimaha faqradan xarfaheeda ku xusan midkood ama dhammaantood, waxay ku waayayaan xilkooda seddex meelood laba meelood (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada.

## Wax-kabedelka Ciwaanka Qaybta Afraad ee Dastuurka

Qaybta Afraad Ciwaankeeda waxaa loo bedelay "Golaha Garsoorka".

## Wax-kabedelka Qodobka 90-aad ee Dastuurka

Waxaa gebi ahaanba Dastuurka laga saaray faqradda 3-aad ee Qodobka 90-aad.

## Wax-kabedelka Qodobka 112-aad ee Dastuurka

Qodobka 112-aad faqradiisa 3-aad waxaa loo bedelay sidan "Guddiga doorashada Puntland wuxuu ka kooban yahay tirada xisbiyada rasmiga ah oo midkiiba hal xubin ka imaanayso iyo lix (6) xubnood oo golaha wakiillada iyo golaha xukuumadda midkiiba saddex xubnood ka imaanayso oo muddo 6 sano ah la dooranayo, dibna loo soo dooran karo".



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Wax-kabedelka Qodobka 113-aad ee Dastuurka

Qodobka 113-aad ee Nidaamka Doorashada Guddiga waxaa wax ka beddel lagu sameeyey faqradda 1-aad iyo xarafkeeda (b) iyo faqradda 2-aad, waxaana loo bedelay sidan:

1. Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ayaa bil ka hor ku dhawaaqaya waqtiga loo muddeeyey ansixinta xubnaha guddiga doorashada, waxaana loo soo kala magacaabayaa sida soo socota:

   b. Xisbi walba hal (1) xubin ayuu soo magacaabayaa;

2. Habka waayista ama xil-ka-qaadista xubinta Guddiga doorashada wuxuu la mid yahay kan xubinta Maxkamadda Dastuuriga ah sida ku cad qodobka 98-aad.